

Sideed u heli kartaa una isticmaali kartaa Adeegyada-yada?

Markaad halkan timaadid, sideebaad wax u bilaabi?

Hadii markani kuugu horeyso isticmaalida adeegyada-yada. waxa lagaaga baahan doonaa in aad ballan la dhigatid la-taliye.

La-taliyuhu wuxu halkan u joogaa in nuu:

- ka jawaabo su'aalaha ku saabsan adeegyada;
- kuu gudbiyaa adeegyada aad uga baahantahay ee WOCRC ama kuwa kale oo laga helo beesha,
- bixiyo la-talin muddo gaaban ah;
- qofka ama qoyska ka kaalmeeya mashaakilka xalka deg-dega ah u baahan,
- ta ugu weyna ay tahay inuu si waxtar leh kuu dhegaysto..

Waxan ku talinaynaa in aad wacdid 613-591-3686 si aad ula hadashid , ama aad ballan la dhigatid la-taliye.

La-talia-yaashu way arkaan qof aan ballan la hayn, hase-yeeshee waxa haboon in aad soo wacdid intaanad u iman hadii ay suurto-gal tahay.

Ma inaad lacag ka bixisaa adeegyada-yada ?

Hadii aad arkaysid la-taliye ka tirsan Galbeedka Ottawa(Western Ottawa CRC), wax lacag ah ma bixin-doontid.Qaar ka mid ah barnaamijyada-yada iyo adeegyada-yada waxa la bixiyaa lacag yar. La-taliyaha ayaa kuu sheegi doona wixii kharash ah kulankiina ugu horeeya.

La-taliya-yaasha qaar xafiisyo ku leh halkan uma shaqeeyaan Beesha Galbeedka Ottawa(Western OttawaCRC) , waxa dhici karta in ay la-talintoodu lacag tahay. Waxay kuu sheegi doona kulanka ugu horeeya .



Ilaalinta Xuquuqda Kali ahaansho iyo Qarsoodiga

Waxan ku ballan qaadnay in aan ilaalino macluumaadka kuu gaarka ah. Macluumaadka la noo dhiibey ee lanagu aaminay waan xafidaynaa.

1. Shaqaalaha Beelaha Galbeedka Ottawa (WOCRC) iyo tabarucayaasha oo dhamai waxay ku ballan qaadayaan illaanta qarsoodiga macluumaadka.
2. Macluumaadka ay kaa qaadaan Beesha Galbeedka Ottawa (WOCRC) waxay u isticmaalan oo kali ah adeegyada aad codsatid. Lagaama doonayo inaad bixisid macluumaad ka badan inta laguugu adeegyo.
3. Shaqaalaha Beesha Galbeedka Ottawa (WOCRC) waxay u shaqeeyaan kooxo si ay kuugu fidiyaan adeegyo tafaqyatiran. Macluumaadka waxa wadaagi kara shaqaalaha si toos ah kugu adeega. La wadaagi mayno macluumaad kaaga daka ka baxsan xarunta adeegyada adiga oo ogolaada maa hee (eeg xuduuda qarsoodiga.)
4. Macluumaadka feylkaaga ku jira Beesha Galbeedka Ottawa (WOCRC) ayaa iska leh. Waad arki kartaa feylkaaga hadii aad codsatid.
5. Beesha Galbeedka Ottawa (WOCRC) waxay masuul ka tahay ka jawaabida wixii su'aalo ah ama kale ee aad ka qabtid ilaalinta iyo qarsoodiga macluumaad kaaga .

Xuduudaha Qarsoodiga

Beesha Galbeedka Ottawa (WOCRC) wuxu rikoodh kaaga (feyl kaaga) siin karaa cid kale hadii uu sharci amro..

Tusaalayaasha qaar ka mid ihi waa:

- Hadii aan rumaysano in aad khatar ku tahay naftaada ama cid kale;
- Hadii aan tuhuno in ilmo 16 sanno ka yar uu khatar ku suganyahay;
- Hadii ay maxkamadi amarto..



Macluumaadkan waa la turjumay waxanan mahad u celinaynaa deeq aan ka helnay Community Foundation of Ottawa.

Saacadaha Adeega

Saacadaha hoos ku dhigan soo-dhawynta-yadu way furantahay waxaan jooga la-taliyaal kuu adeegi-doona:

Sebtambar ilaa Maajo

Isniin ilaa Jimce 8:30
subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo

Juun ilaa August

Isniinta ilaa Jimce 8:30
subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo

Himilo Fog

Waxan mustaqbalka hiigsanaynaa in Beesha Galbeedka Ottawa (Western Ottawa) ay ku sugnaato fir-fircooni, nabadgalyo, caafimaad, taas oo qof kastaa uu heli-karo isticmaalina-karo adeegyada iyo kaydka ay ugu baahanyihiin. caafimaadka iyo wanaag-sanaanta .

Hadaf

Xarunta Kaydka ee Beesha Galbeedka Ottawa (Western Ottawa Community Resource Centre) waxay baheysatay kuwa kale si ay u horumariyaan, una fidiyaan, oo ay xidhiidhi-yaana siday helitaanka iyo isticmaalida adeegyada caafimaadka iyo bulshadu ugu fududaanlahay xubnaha beelaheena kala duwan oo dhan..

Waxan ku ballan-qaadnay in aan hubino sidii loogu heli-lahaa looguna isticmaali-lahaa adeegyada iyo barnaamijyada la noo xilsaaray Af-faransiis tayo leh oo rasmi ah.

Barnaamijyada iyo Adeegyada

La-talinta, macluumaad iyo u-gudbin
xarunta carrurta da' dugsiyeedka ka
horeysa ee Ontario.-Carleton
Adeegyada carrurta iyo qoysaska

Adeegyada dhalinyarada iyo qoysaska
Xarunta adeegyada ka soo horjeeda dhi-
baateynta dumarka
Chrysalis House

Horumarinta Beesha
Adeegyada waayeelka iyo dadka
waaweyn ee naafada ah
Adeegyada tabaruca –yaasha (iskaa wax
u qabso)



2 MacNeil Court, Kanata, Ontario K2L 4H7

Talifoon: 613-591-3686

Fax: 613-591-2501

TTY: 613-591-0484

Web: www.communityresourcecentre.ca

E-mail : info@communityresourcecentre.ca



www.coalitionottawa.ca



Western Ottawa Community Resource Centre

SOMALI

Soo dhawaada dhammaantiin.
Waxan fidinaynaa la-talin qarsoon,
macluumaad, u-gudbin adeegyada
kale iyo caawimo naftaada ah,
qoyskaaga, saaxiibadaa iyo jiiraan
kaaga. Adeegyadayadu waxay ku
baxaan Af-Ingriis iyo Fransiiska.
Hadii aad codsatid turjume waa
laguu keeni doonaa.

613-591-3686
2 MacNeil Court, Kanata